

Su'aalaha ku saabsan Fasaxa Jirada ee Mushaarka Lagu Bixiyo iyo Karoonafayras (COVID-19)

- 1. Shaqaaluhu ma isticmaali karaan fasaxa bukaanka mushaharka leh si ay u daboolaan maqnaanshaha haddii sarkaal dawladeed xidho meheraddiisa ganacsi sabab la xidhiidha COVID-19? Maxaa dhacaya haddii loo shaqeeyuhu wali sii shaqeynayo, laakiin uu xannibyo ku leeyahay hawlgallada amarkii taliyaha aawadood?**

Hadday weli shaqeyso, shaqaaluhu waxay isticmaali karaan fasax mushahar xanuun oo la uruuriyey. Haddii loo shaqeeyaha shaqada ka ceyriyo qof, shaqaaluhu wuxuu codsan karaa dheefaha shaqo la'aanta.

- 2. Sidee bay shaqaaluhu ku ogaadaan inay wali shaqeynayaan?**

Loo shaqeeyayaashu waa inay u sheegaan shaqaalaha haddii ay fasaxayaan. Shaqaaluhu waxay fayl garaysan karaan manfacyada shaqo la aanta haddii ay shaqeeyaan ama haddii saacadooda la yareeyo.

- 3. Haddii dugsiga ama goobta daryeelka ilmaha shaqaaluhu si ku meel gaadha u xiranto sababo caafimaad awgeed, miyuu shaqaaluhu isticmaali karaa fasaxa mushaharka leh ee daryeelka ilmaha?**

Haa.

- 4. Haddii goobta ganacsiga shaqaalaha ama dugsiga ilmaha ama goob daryeel la xiro, miyuu shaqaaleysiiyuhu diidi karaa fasaxa mushaharka leh ee xanuunka oo u baahan karaa in shaqaaluhu kasoo shaqeeyo guriga?**

Maya.

- 5. Haddii shirkadu go'aansato inay si ku meel gaar ah u xidho goobteeda ganacsiga si loo yareeyo halista faafida cudurka COVID-19, shaqaaluhu ma u adeegsan karaa fasaxa mushaarka lagu qaato ee dadka jirada si uu mushaar u helo intuu maqan yahay?**

Shaqaaleysiye loogama baahna inuu u ogalaado shaqaaluhu in ay isticmaalaan mushaharka fasaxa qof xanuusanaaya lasiiyo hadii ganacsigu go'aansado inuu xiro si looga hortago COVID-19. Hase yeeshee, shaqaaleysiiyuhu wuxuu ogalaan karaa isticmaalka mushaharka fasaxa bukaanka ee xaaladan.

- 6. Miyey shaqaaleysiiyayaashu uga baahan karaan shaqaaluhu in ay shaqada ka tagaan khatarta COVID-19 awgeed?**

Shaqaaleysiiyuhu wuxuu uga baahan karaa shaqaaluhu in ay ka tagaan shaqada. Hase yeeshee, shaqaaleysiiyuhu **ugama baahan karo** shaqaaluhu in ay u isticmaalaan mushaharka fasaxa bukaanka in ay ku daboolaan maqnaanshahooda.

7. Miyuu shaqaale looga baahan yahay inuu ka tago shaqada maxaa yeelay waxay khatar ugu jiraan COVID-19 u isticmaali karaa mushaharka ururay ee fasaxa bukaanka inuu maqan yahay?

Shaqaaluhu wuu isticmaali karaa mushaharka fasaxa bukaanka ee ururay. ase yeeshee, shirkadaha loo shaqeeyo kuma qasbi karaan shaqaalaha inuu adeegsado fasaxiisa mushaarka uu ku helaayo ee fasaxa jirada ee u kaydsanaa.

8. Shaqaaluhu ma adeegsan karaan fasaxa mushaarka lagu bixiyo ee dadka jirada ee u kaydsanaa haddii uu xanuunsado ama uu dareemaayo calaamado laga yaabo inay la xariiraan cudurka COVID-19?

Miyuu shaqaaluhu u adeegsan karaa musharka fasaxa lagu bixiyo ee jirada ee u kaydsanaa xanuun kasta oo jireed, dhaawacyo, ama xaalado kale oo caafimaad. Wuxuu sidoo kale u adeegsan karaa mushaarka fasaxa jirada lagu bixiyo ee dadka jiran ee u kaydsanaa si uu ugu daboolo xubin kasta oo qoyskiisa ah oo qaba xanuun jireed, dhaawacyo, ama xaalado kale oo caafimaad.

9. Miyuu shaqaale u isticmaali karaa mushaharka fasaxa jirada hadii dhakhtar ku taliyo sidaasi iyadoo ay ugu wacan tahay khatarta ama astaamaha COVID-19?

Haa.

10. Miyuu shaqaale u isticmaali karaa mushaharka fasaxa jirada hadii uu raadinaayo baadhis caafimaad, daryeel, daaweyn ama ka hortag xanuun ama astaamaha la xiriira COVID-19?

Haa.

11. Haddii shirkada loo shaqeeyo ay bixiso fasaxa mushaarka lagu qaato ee dadka jirada oo qayb ka ah barnaamijkeena fasaxa mushaarka lagu qaato (PTO), shaqaaluhu ma u adeegsn karaan fasaxa PTO maqnaansho la xariira cudurka COVID-19?

Haa.

12. Sidee shirkaduhu u siiyaan shaqaalahooda mushaarka dheeraadka ah ee lagu bixiyo fasaxooda jirada ama sidee oga caawiyaan inay kasoo kabsadaan mushaar la'aanta uu sababay cudurka COVID-19?

- Shirkadaha loo shaqeeyo ayaa bixin kara fasaxa mushaarka lagu qaato ee dadka jirada oo deeqsinimo leh kaasoo ka badan sharciyada fasaxa mushaarka lagu qaato ee dadka jirada ay amrayaan.
- Shaqaaleysiiyayaashu waxay u ogolaan karaan in shaqaaluhu u isticmaalaan mushaharka fasaxa jirada ujeedooyin ka baxsan ujeedooyinka loo ogol yahay.
- Shaqaaleysiiyayaashu waxay si ku meel gaadha u dooran karaa in ay ka daayaan shuruudaha xaqijinta shaqalaha u isticmaalaya mushaharka fasaxa jirada ee la xiriira COVID-19.

- Shaqaaleysiiyayaashu waxay horumarin karaan oo hirgalin karaan siyaasado cusub si ay usoo agaasimaan mushaharka fasax jirada.
- Shaqaaleysiiyayaashu waxay siin karaan shaqaalaha mushahar horumarin ah, ilaa iyo inta shuruudaha lacag bixintu waafaqsan yihiin shuruucda khuseysa.
- Shaqaaleysiiyayaashu waxay sameyn karaan siyaasadaha fasaxa la wadaago. Waxay sidoo kale u ogolaan karaan shaqaalaha hadhaaga fasaxa si ay ugu deeqaan fasaxa la shaqeeyayaasha.